XAQIIQOOYINKA SAYNISEED EE ISLAAMKA
QAYBTA 10AAD:
Uumibaxa dheregdhaafsan ee Qur'aanka Kariimka

THE SCIENTIFIC TRUTH OF ISLAAM, PART 10:
The potential evapotranspiration of the Qur'aan

W/Q: Dr. Warfa Abdi Mohamed (Garweyne), former lecturer in Hydrogeology and Groundwater scientist.

Waxaan qormadan u hibeeyey Dawladda Federaalka Soomaaliyeed, dadaalkeeda daarran soocelinta iyo dhisidda dawladnimo Soomaaliyeed. Waxaan ku boorrinayaa dadaalka ay ugu jirto ilaalinta nabadgelyada, madaxbannaanida iyo ilaalinta midnimada Soomaaliyeed dal iyo dadba (security, sovereignty, unity and territorial integhrity). Waxaan kale oo aan ku boorrinayaa in ay wasaaradaha dawladda u qaybiso dawladgoboleedyada si gobol walba dadkiisu u helaan shaqo una dareemaan in dawladdu la joogto, sida lagu yaqaan federaaliismada dhabta ah.

FIIRO GAAR AH: FADLAN OGOW QORAALKANI MA AHA QIILA-WA-QAALA LAGU QORO INTERNETKA, WAA XAQIIQOOYINKII SAYNISEED EE ISLAAMKA OO U BAAHAN AKHRIN IYO KU BARAARUG DHAB AH. (FADLAN SII FIDI SI KALIMADDA ALLAAH AY U NOQOTO TAN SARRAYSA).

Hordhac

Isagaoo kaalmaysanaya awoodda Alle ee weyn, wuxuu qoraagu iskudeyeyaa in uu muujiyo in Qur'aanka Kariimku uusan ahayn kitaab cibaado oo keliya (soon & salad) ee uu yahay, weligiisna ahaa, aqoon sayniseed had iyo goor cusub oo xaqiiq ah (new scientific truth). Run ahaantii,

- Wax walba oo farsamo ahaan xaqiiq u ah (technically true), ama
- Xisaabin ahaan xaqiiq u ah (mathematically true), ama
- Caqli ahaan xaqiiq u ah (logically true), ama
- Adeegsi ahaan xaqiiq u ah (practically true), waxaa la yiraahdaa saynis.

Islaamku si kastaba waa aqoon sayniseed, waayo wuxuu wax ka sheegaa dhacdo, wuxuu dhacdadaas ka sheegaa xaqiiq, xaqiiqdaasina marnaba ma beenowdo (**ever truth**). Islaamku wixii uu beeniyo wax rumayn karaa ma jiraan, wixii uu xaqiijiyana wax baabi'inkara ma jiraan (**powerful scientific truth**). Haddii, haddaba, ay timaaddo tijaabo sayniseed aad loo rumaysto, haseyeeshee, aan waafaqsanayn Qur'aanka Kariimka, tijaabadaasi ilaa ay ka waafaqdo Qur'aanka Kariimka waxay ku jireysaa horumarin iyo odoros joogto ah. Sidaa daraadeed:

- Qur'aanka Kariimka waa la waafaqaa ee isagu waxba ma waafoqo (**the standard**). *Muxkamka* (provable) iyo *mutashaabaha* (improvable) ee Quraanku midna uma dhigmo nooc kasta oo cilmi kale ah.
- Qur'aanka Kariimku waa mabaadii' sayniseed oo dhamaystiran (**the complete**).
- Qur'aanka Kariimka waa la xigtaa ee isagu waxba ma soo xigto (**the reference**).

Haddaba, wuxuu qoraagu ka afeefanayaa:

a) in wixii uu qoraagu ku gefo ay tahay wax shakhsi ahaan qoraaga ugu kooban ee ma aha wax ka mid ah Islaamka, wixii uu xaqiijiyaana ay tahay Alle galladdiis;
b) in uusan soo gudbin doonin wacdiga diiniga ah ee aayadaha Qur'aanka; wuxuu soo gudbinayaa oo keliya awoodda sayniseed ee ka buuxda Aayadaha Qur'aanka Kariimka iyo Sunnada (the powerful scientific principals);
c) in Aayadahaas iyo Axaadiistaas aan loola jeedin mayal-adayg diimeed, iyo xagjirnimo ee loola jeedo oo keliya soogudbinta xaqiiqooyinka sayniseed ee Islaamka oo keliya.

Uumibaxa dheregdhaafsan ee Qur'aanka Kariimka

Uumibixa guud (evapotranspiration) waxaan ku soo balballarinnay qaybtii shanaad, hase yeeshee, waxaan qaybtan ku eegidoonnaa uumibaxa dheregdhaafsan. Xaqiiqooyinka sayniseed ee Islaamka waxaa ka mid ah kuwan soo socda.

*Samada waxaan ka soo dejinney **biyo** jaan-go'an (water budget balance), waxaan ku sugnay dhulka dhexdiisa (Infiltration), in aan dib ula noqonnana waan awoodnaa (Evapotranspiration). Waxaan biyihii idinkugu abuurnay beero timir iyo canab ah (Evapotranspiration)* (**Qur'aan Kariim, Al-Mu'minuun, A: 18-19**).

*Allaah waa kan samada ka soo dejiya **biyo**, waxaan biyahaas ku soosaarnay doog dhammaantiis, dooggaas oo aan ka soo bixinno miro iskorsaaran (Potential Evapotranspiration). Waxaan ku soosaarnaa geed timireed leh laamo ay goosashadoodu dhowdahay. Biyihii waxaan kale oo aan ku soosaarnay beero canab, olives, iyo rumaan oo isuwada eg haddana kala duwan (Potential Evapotranspiration). Bal eega mirayntiisa iyo bisaylkiisa (Potential Evapotranspiration), waxaas oo idili xujo ayey u yihiin umaddii rumaynaysa Allaah* (**Qur'aan Kariim, Al-Ancaam, A: 99**).

*Waxaan daruuraha ka soodejinney **biyo** aad u fara badan si aan ugu soosaarno dalag, daaq iyo beero isku dulbaxay (Potential Evapotranspiration).* (**Qur'aan Kariim, An-Naba', A: 14-16**).

*Nolosha adduunku waxay la mid tahay **biyo** aan ka soodejinney samada oo biyihii dartood uu dooggii dhulku iswadaqabsaday, iskuna dheehmay (Potential Evapotranspiration), ha ahaado mid ay dadka ama xooluhuba cunaane, ilaa dhulku qaatay dhaldhalaalkiisii uuna muujiyey quruxdiisii (Potential Evapotranspiration,) ...* (**Qur'aan Kariim, Yuunis, A: 24**).

*Tusaale uga dhig in nolosha adduunku ay tahay sidii **biyo** aansamada ka soodejinney (Precipitation), dabadeedna biyihii dartood dooggii iyo dhirtii dhulku ay isdheeheen (Potential Evapotranspiration), dabadeed dhirtii iyo dooggii ay qallaleen oo ay dabayshu bitisay, Allaah waakan wax walba awooda* (**Qur'aan Kariim, Al-Kahf, A: 45**).

*Allaah waa kan dhulka idiin fidiyey, waddooyinna idinkaga jeexay, samadana ka soodejiyey **biyo** uu ku soosaaray doog iyo dalag lammaane ah, haddana kala duwan (Potetial Evapotranspiration)* (**Qur'aan Kariim, Daha, A: 53**).

Qeexid

(Evapotranspiration = evaporation + Transpiration)

Marka laga eego sababta dhalisay, qaddarka biyaha ah ee ka uumibaxa dhulka dushiisa waxaa loo kala qaybiyaa uumibaxa uu sababay heerkulka qorraxdu (Evaporation) iyo kan uu sababay neefsiga dhirtu (Transpiration). Wadarta labadan *paramitar* waxaa la isku yiraahdaa uumibaxa guud (evapotranspiration).

(Evapotranspiration = Real & Potential)

Marka laga eego qaddarka iyo qaabka, uumibaxa guud ee biyuhu wuxuu u qaybsamaa laba qaybood: uumibaxa caadiga ah oo uu sababay heerkulka hawada iyo neefsiga dhirta (real evapotranspiration, akhri qaybtii 5aad), wuxuuna dhacaa inta biyo jiraan oo keliya; iyo uumibaxa dheregdhaafsan (potential evapotranspiration), wuxuuna dhacaa xaalado gaar ah (eeg cinwaanka soo socda).

Macluumaadka Qur'aanka Kariimku ka bixiyey Potential Evapotranspiration

Aayadaha 18 iyo 19aad ee suuradda Al-Mu'minuun waxay xaqiiqdii muujinayaan akhbaaraad aad u tayo sarreeya sida dhelliga biyaha dunida oo dhan (global hydrological balance) oo uu ku jiro uumibaxa biyaha ee dhulka iyo uumibixinta biyaha ee dhirta (evapotranspiration). Hase yeeshee, aayadaha ka dambeeya kuwa Al-Mu'minuun ee sare waxay dhammaantood ka hadlayaan uumibixin gaar ah oo luqadda qalaad lagu yiraahdo ***Potential Evapotrnspiration*** oo qoraagu u bixiyey **Uumibaxa Dheregdhaafsan**. Siyaabaha uu Qur'aanka Kariimku u sheegay Uumibaxa Dheregdhaafsan waa siyaabaha soo socda (eeg sawirka hoose). ***Potential Evapotrnspiration*** wuxuu dhacaa:

- Marka dhulka roob ku do'o, dhulkuna soosaaro doog iyo dalag dhammaantiis, doogga iyo dalagga dhulku iswada qabsado, iska dulbaxo, iskuna dheehmo (Qur'aan Kariim, akhri aayadaha An-Naba' iyoAncaam);
- Marka dhulka roob ku do'o, miraha geedku ay aad u fara bataan, goosashadooduna soodhowaato (Qur'aan Kariim, akhri aayadaha Ancaam);
- Marka dhulka roob ku do'o, waxsoosaarka dhulku iyo mirihiisuba ugu badan yihiin oo ay isdheehaan (Qur'aan Kariim, akhri aayadaha Al-Kahf);
- Marka dhulka roob ku do'o, dhulku soosaaro dalagyo lammaane ah, haddana kala duwan noocyo ahaan iyo cadad ahaan (Qur'aan Kariim, akhri aayadaha Daha);
- Marka dhulka roob ku do'o, dhulku qaato dhaldhalaalkiisa, uuna muujiyo quruxdiisa (Qur'aan Kariim, akhri aayadaha Yuunis).

Xaaladahan aan kor ku soo sheegnay waxaa keliya oo suurageliya biyo aad iyo aad u tiro badan oo aan kalago' lahayn sida ay aayadaha oo dhammi wada tibaaxeen. Dhammaan xaaladahan sare ee ay aayadaha Qur'aanka Kariimku sheegeen waxay ku wada sargo'an yihiin dhacdada loo yaqaan ***Potential Evapotranspiration*** ee soo socota (eeg sawirka hoose).

Macluumaadka saynisku ka ogyahay *Potential Evapotranspiration* ee la daahfuray

Potential Evapotranspiration (eeg sawirka hoose) wuxuu, caadi ahaan,dhacaa marka:

- Helitaanka biyuhu uu aad iyo aad u badan yahay oo ay meel walba waran yihiin (abundancy of water);

- Qoyaanka carradu aad u sarreeyo (high soil moisture);
- Doogga iyo dalagyaduba ugu badan yihiin (intensive vegetation),;
- Cimiladu kulushahay (high atmospheric temperature);
- Dhirtuna ubaxa iyo miraha bixinayso.

Xaaladahani waxy abuuraan uumibixinta biyaha iyo neefsiga ugu badan ee dhirta (high potential evapotranspiration), waxayna ku sargo'an yihiin sida ay faahfaahiyeen aayadaha tirada badan ee aan kor ku soo taxnay, aayadahaas oo soo degey in ka badan 14 qarni ka hor.



Sawirka 1aad: Xaaladaha uu dhoco ***Potential Evapotranspiration***.

Qur'aanku waa xaq, Allaahna run buu sheegay: *Potential Evapotranspiration* waa xaqiiq sayniseed oo Qur'aanka Kariimku daahfuray in ka badan 14 qarni ka hor.

Sida aan kor ku soo aragnay, akhbaarta ay aayadaha Qur'aanku bixiyeen, run ahaantii, waa xaqiiqooyin sayniseed oo aad u awood weyn (very powerful scientific truth), Aayaduhu waxay ka hadleen cilmiga *Hydrogeology-ga* qaybaha la siiyo ahmiyad gaar ah. Waxaa kale oo xusuus mudan in ay aayadahani soo degeen in ka badan 14 qarni ka hor xilli *geology* iyo *hydrogeology* midna aan waxba laga garanayn. Waxaa keliya oo la oran karaa: Qur'aanka Kariimku waa cilmi aad u awood weyn oo caaajis geliya culuunta casri walba.

Islaamku waa aqoon sayniseed aad u awood weyn, hase yeeshee, aan lagu fasirin ama lagu cabirin amuuraha iyo isbedellada ka dhaca adduunka. Qur'aanka iyo Sunnadu waxay saamayn aad iyo aad u weyn ku yeesheen nolosha aadanaha oo dhan. Waxay ku dhaliyaan qofka iyo qoomiyaddaba isbedel aan jujuub ahayn, isbedelkaas oo qurux iyo qiime gaar ah ku soo kordhiyey tayada nolosha aadanaha. Wuxuu isbedelkaasi abuuraa in qofku yeesho dhaqan cilimiyeysan (scientific culture), in uu yeesho shakhsiyad wanaagsan iyo mustawe nololeed oo sarreeya.

(Macluumaadka ku saabsan Qur’aanka iyo *Potential Evapotrtanspiration* waxaa aad loogu balballaariyey cadadka saddexaad ee NOLOLI WAA BIYO, cutubka 17aad).

Warfa Abdi (warfagarweyne@hotmail.com)

FADLAN SII FIDI SI KALIMADDA ALLAAH AY U NOQOTO TAN SARRAYSA.